



yaan lagu dayn ratina inay ku xirnaato qoortiisa kuul iyo qardhaas toona, waana in laga wada goyaa)

Abii Bashiir Alansaari-Allaha ka raali ahaade: Wuxuu la socday Rasuulka Ilaahay scw safarradiisa qaarkood, wuxuuna yiri: Rasuulka scw: qof ayuu diray, dadkii oo jooga halkii la dagay -:(yaan lagu dayn ratina inay ku xirnaato qoortiisa kuul iyo qardhaas toona, waana in laga wada goyaa).

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu jirey safaradiisii mid ka mid ah, dadkuna waxay ku sugnaayeen meeshii ay dageen iyo tendhooyinkooda, qof buuna u diray dadka -si uu fariin ugu sheego- taasoo ah: in laga wada jaro wax yaabaha qardhaasaha ah ee awrta qoorta loogu xiray, ha ahaado xadhib, ama waxkale sida koorta ama kabaha, waayo waxaasay u xiri jireen, cabsi ay ka qabeen isha darteed, waxaana la amaray inay ka jaraan xoolaha waxaa, waayo wax ay ka difaaci kartaan jirin, wax tarka iyo wax yeelladuba gacanta Ilaahay bay ku jiraan, kaligi cid la wadaagta ma jirto.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/6761>